

Adeeg cusub oo xiriir la leh wargelinta ka maqnaanshada Dugsiyada biloowga/hoose/dhexe iyo dugsiyada sare

Tan iyo bishii 1 luulyo 2021 waxaa la joojiyay isticmaalka app-ka [Dexter] ee berri hore nalagu wargelin jiray ka maqnaanshada. Beddelkii waxay xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta adeegsan karaan adeegyada farsamada digitalka ku salaysan [e-tjänsten] [SAITS].

Markii semesterka xilliga dayrta u bisha sideedaad bilaawdo, lama isticmaali doono app-yada [Dexter/Extens], kuwaasoo xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta berri hore isticmaali jireen markii ka maqnaanshada ilmahooda na wargelinayaan.

Wargelinta Ka maqnaanshada awgeed waxaa la isticmaali doonaa adeegyada farsamada digitalka ku salaysan [e-tjänsten] [SAITS för vårdnadshavare Länk till annan webbplats](#). Kaasoo lagu guda geli karo iyadoo la adeegsanayo aqoonsiga farsamada digitalka ku salaysan ee loo yaqaanno [e-legitimation - Bank-ID].

Ku saabsan kuwa dugsiyada sare, waxay weli haystaan fursad ay ka maqnaanshada nagu wargeliyaan khadka taleefanka ee iskuulka, inkastoo haddana aan ka dhowrbidaynno inaad isticmaashaan adeegyada farsamada digitalka ku salaysan [e-tjänsten]. Halka Dugsiyada biloowga/hoose/dhexe ma lahaan doonaa khad taleefan oo nalagu wargeliyo ka maqnaanshada. Xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta waa in ay isticmaalaan adeegyada farsamada digitalka ku salaysan [e-tjänsten]

Warbixin ku saabsan app-ka [SAITS] ee xilhaayeha xannaanadda/waalidka loogu talagalay

Wargelinta ka maqnaanshada ka sokkoow, waxaad app-ka [SAITS] ee xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta loogu talagalay, ka aqrisan kartaan warbixin ku saabsan jadwalka ubadkiinna, xog ku saabsan

dugsi-dhigashada, ka maqnaansho iyo shahaadooyinka. Marka hore ee aad guda galayso app-ka [SAITS] ee xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta loogu talagalay waa inaad ku buuxisa warbixinta faahfaahinta xiriirka. Tilmaan bixin ku saabsan qaabka xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta ay u isticmaalaan app-ka [SAITS]. [Instruktioner för att använda SAITS för vårdnadshavare](#)